

INDEPENDENT SCHOOL DISTRICT 196
Rosemount-Apple Valley-Eagan Public Schools
Educating, developing, and inspiring our students for lifelong success.

Series Number **501.3.2.4P** Adopted **April 2024** Revised _____

Horyaal Ogeysiis ku socda waalidka ama masuulka

Ogeysiis

Baarista carruurnimada hore waxay ka caawisaa degmada inay aqoonsato carruurta laga yaabo inay ka faa'iidaystaan degmada iyo ilaha bulshada ee diyaar u ah inay ka caawiyaan horumarkooda. Baadhitaanka korriinka ilmanimada hore waxa ka mid ah baadhista aragga oo ka caawisa in la ogaado dhibaatooyinka iman kara ee indhaha laakiin aan ahayn beddelka baadhista indhaha oo dhamaystiran. Baadhitaanka waxa ku jira ugu yaraan qaybahan soo socda: qiimaynta korriinka, baadhista maqalka iyo aragga ama gudbinta, dib u eegista tallaalka iyo gudbinta, dhererka iyo miisaanka, taariikhda ubadka baadhitaankii aragga dhamaystiran ee ugu dambeeyay, haddii ay jirto, ogaanshaha arrimaha khatarta ah ee saamayn kara waxbarashada. waraysi lala yeeshay waalidka oo ku saabsan ubadka, iyo u gudbinta qiimaynta, ogaanshaha, iyo daawaynta marka baahiyaha iman kara la ogaado. Baadhitaanka kuma jiri doono shaybaadhka ama baadhis jidheed.

Dawladdu waxay u baahan tahay in ilmahaagu helo baadhista korriinka ee noocaas ah ama inaad bixiso diiwaannada caafimaadka ee tilmaamaya in ilmahaagu ka helay baadhis korriin la mid ah 365 maalmood ee la soo dhaafay oo laga helay urur daryeel caafimaad dadweyne ama mid gaar loo leeyahay ama bixiye daryeel caafimaad shakhsi ah. Tan waa in la sameeyaa ugu dambayn 30 maalmood ka dib maalinta koowaad ee dugsiga dadweynaha.

Sida uu dhigayo sharciga Minnesota, ilmaha waa in aan lagu qorin kindergarten ee dugsiga dadweynaha ilaa waalidka ama masuulka ubadku u soo gudbiyo maamulaha dugsiga ama qof kale oo leh kontoroolka guud iyo kormeerka dugsiga diiwaanka muujinaya bilaha iyo sanadka ilmuhu helay baadhista korriinka iyo natiijooyinka baadhista ugu dambayn 30 maalmood ka dib maalinta koowaad ee imaanshaha. Haddii ilmaha laga soo wareejiyo xanaanada loona wareejiyo mid kale, waalidka ama masuulka ubadka waa in loo ogolaado 30 maalmood inuu ku soo gudbiyo diiwaanka ubadka, wakhtigaas oo uu ilmuhu dugsiga dhigan karo.

Inta lagu jiro baaritaanka, waxaad xaq u leedahay sharciga hoostiisa inaad diido inaad ka jawaabto su'aalaha ama aad bixiso macluumaadka ku saabsan xaaladaha qoyska ee saameeya horumarka iyo aqoonsiga arrimaha khatarta ah ee saameyn kara waxbarashada. Diidmada ka jawaabista su'aalaha ama bixinta macluumaadka kama diidayso ilmahaaga in lagu qoro dugsiga dadweynaha haddii dhammaan qaybaha kale ee baaritaanka la buuxiyo. Intaa waxa dheer, baadhista looma baahna haddii qoraal uu saxeexo waalidka ama masuulka ubadka loo gudbiyo maamulaha dhismaha ilmahaaga oo sheegaya diidmada baadhista iyadoo lagu salaynayo caqiidooyinka damiirka leh ee waalidka ama masuulka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Baaritaanka Carruurnimada Hore waxaa laga heli karaa gudaha Minnesota Statute § 121A.17.